

# SIDA LOO CODEEYO

**VOTE**  
I WILL  
VOTE  
**2018**

*Codka aad bixinaysaa waa codkaaga—isdiiwaangeli, war hel, soco oo coday!*

## YAA CODAYN KARA?

Si aad Minnesota uga codayso, waa in aad tahay muwaadin Maraykan ah, ugu yaraan jira 18 sano Maalinta Doorashada, aadna deganayd Minnesota ugu yaraan 20 maalmood.

Haddii dembi culus lagugu xukumay, waad codayn kartaa ka dib markaad dhammaysato dhammaan qaybaha xukunkaaga, oo ay ka mid yihiin tijaabo dembiile, siidayn waqtigii oo aan la gaarin, ama shuruudo kale sida magdhaw.

Waad codayn kartaa adigoo wali hoos jooga/kaa mas'uul yahay, haddii aan garsoore kaala noqon xaqqa aad u leedahay codbixinta.

## ISDIIWAANGELI SI AAD U CODAYSO

Waa in aad ka diiwaangashan tahay cinwaankaaga hadda si aad u codayso. Si aad isu diiwaangeliso ama diiwaangelintaadii hore wax uga beddesho, tag [mnvotes.org](http://mnvotes.org)

Sidoo kale waxaad iska diiwaangelin kartaa meesha doorashadu ka dhacayso ee deegaankaaga Maalinta Doorashada. Waa in aad tustaa caddayn ah magacaaga iyo cinwaankaaga hadda. Wixii faahfaahin ah, booqo [mnvotes.org](http://mnvotes.org) ama wac 1-877-600-VOTE.

*waa socotaa eeg bogga gadaale...*

**Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota**  
**[mnvotes.org](http://mnvotes.org) • 1-877-600-VOTE**

## TAARIIKHAHA 2018

### DOORASHADA AASAASIGA

Talaada, 14ka Bisha 6aad  
(August)

### MAQNAANSHO KU CODAY

Coday adigoo boostada ku soo diraya ama qof ahaan imanaya  
21ka Bisha 14aad (September)  
ilaa 5da Bisha 11aad (November).

### ISDIIWAANGELI SI AAD U CODAYSO

Hory isudiiwaangeli ugu dambayn  
16ka Bisha 10aad (October)  
si aad waqti u hesho Maalinta  
Doorashada.

### MAALINTA DOORASHADA

Talaada, 6da Bisha 11aad  
(November)

# SIDA LOO CODEEYO

.....  
...ka timid horay

## **ARAG TUSAALE AH WARQADDAADA CODBIXINTA**

Si aad u aragtid musharixiinta iyo su'aalaha ku qornaan doona warqaddaada codbixinta, booqo [mnvotes.org](http://mnvotes.org).

## **GOOBAHA IYO SAACADAHA CODBIXINTA**

Si aad u hesho meesha aad ka codbixinayso, booqo [mnvotes.org](http://mnvotes.org). Goobaha codbixinta badankoodu waxay furan yihiin laga bilaabo 7da subaxnimo ilaa 8da fiidnimo.

## **WAXA AAD SOO QAADANAYSO**

Haddii aad ka diiwaangashan tahay in aad ka codayso cinwaankaaga hadda, uma baahnid in aad la timaadid aqoonsi. Haddii aad u baahan tahay in aad isdiiwaangeliso ama diiwaangelintaadii hore wax ka beddeshid, waad u baahan doontaa in aad tusto caddayn deganaanshahaaga ah intaadan codayn. Haddii aad rabto in aad ogaato wax intaa ka badan, booqo [mnvotes.org](http://mnvotes.org) ama wac 1-877-600-VOTE.

## **HORAY UGU CODAY WARQADDA CODBIXINTA MAQANAHA**

Horay ayaad uga codayn kartaa xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga laga bilaabo Jimce 21ka Bisha 9aad (September). Waxaad kaloo codsan kartaa in boosta laguugu soo diro warqadda codbixinta maqanaha. Si aad u heshid xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga ama aad u codsatid warqadda codbixinta maqanaha, booqo [mnvotes.org](http://mnvotes.org)

### **SHAQADA OO LAGAA FASAXO SI AAD U CODAYSO**

*Waxaad xaq u leedahay in shaqada lagaa fasaxo si aad u codayso, adiga oo aan lagaa goynayn lacag, fasaxa gaarka ah, ama fasax aad xaq u yeelatay.*

***Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota***  
***[mnvotes.org](http://mnvotes.org) • 1-877-600-VOTE***